

Adeega dhaqtarka iskuulka

Warqad loo dirayo waalidka iyo masuulka mustaqbalka ee koowaad caruurta xanaanada-caruurta

## Baaritaanka caafimaadka ee iskuulka

Waalidiinta iyo masuulka xushmada mudan

Fasaxa soo socda ee xilliga kulaylaho kadib ilmahaagu waxuu galayaa xanaanada caruurta Tallaabadan noloshiisa ka mid ah waxa urajeyneynaa bilaw wanaagsan iyo khibrado badan oo wanaagsan.

### **Baaritaanka cusub ee ilaaliinta caafimaadka**

Adeegga caafimaadka ee iskuulku wuxuu taageeraa dhammaan caafimaadka arayda xanaanada caruurta ilaa dugsiga sare. Nidaamka iskuulada qaranka waxuu qorayaa sedex baaritaan caafimaad horleh ee iskuulada oo qasab ah. Ujeedada baaritaanadan waa in waqtii hore la ogaado halista iyo horumarka caruurta, si hadii loo baahdo tallaabooyin looga qaado. Taasi waxaa loogu talo galay in la qorsheeyo shuruudo wanaagsan ee waqtiga iskuulka.

### **Baaritaanka caafimaadka horleh ee iskuulka ee dhataatiirta caruurta ama dhaqtarka qoyska ee 4-sanadlaha ah waa in la sameeyaa oo caddayntiisa loo gudbiyaa adeega dhaqaatiirta iskuulka**

Baaritaanka caafimaadka horleh ee iskuulka ee koowaad waxaad lagu samaynayaa xanaanada-caruurta Nidaam goboleedka iskuulada qaranka waxuu qorayaa in baaritaanada caafimaad ee iskuulada ee dhaqaatiirta gaarka ama dhaqaatiirta caruurta ay sameeyaan loo tixgeliyo qayb kamid ah baaritaanada 4-sanadlaha. Baaritaanku waxuu ka kooban yahay aragga iyo maqalka, dhiriirkha iyo culayska, marxallada tallaalka iyo qiimeynta horumarka. Baaritaanka caafimaadka horleh ee iskuulada fulintooda waa in adeega caafimaadka iskuulka loo cadeeyaa ilaa iyo 31ka oktoobar ee sanadka koowaad ee xanaanada-caruurta. Sida ugu wanaagsan waa foomka caddaynta (huruudka) si toos ah aad ugu geysid dhaqtarka caruurta.

► **Soodir warqada tallaalka**

Haddii iskuulka laga helo cudurada halista ee lays qaadsiiyo, sida Tusaale ahaan Jadeeco ama meningitis purulent. Adeega caafimaadka gobolka baa ka hortagaaya sii faafida cuduradaan. Si loo qaado tallaabooyinka loo baahan yahay iyada oo aan waqtii lumin waxaa muhiim ah inay caruurta ardayda ay ogaadaan kahor intaan cuddurka la helin.

Sidaas darteed waxaan kaa codsanaynaa inaad warqada tallaalka nuqlkeeda soo dirtid ama foomka cadaynta tallaalka (huruudka) uu dhaqtarka ku diiwaan geliyo.

► **Arrimaha caafimaadka**

Waa muhiim arrimaha caafimaad ee hadda jira iyo kuwa mustaqbalka in lagu simo marxalladaha daryeelka caafimmaad ee ardayda iskuulka. Sidaas darteed si qarsoodi ah baan natijjooyinkabaaritaanada caafimaad u qiimaynaynaa, taasi waxay inoo suurtogalinaysaa inaynu diiwaan gelino marxalladaha caafimaad ee ardayda caruurta Zurich. Waad inaga caawini kartaa dhaqdhaqaqan muhiimka ah, haddii aad foomka caddaynta inoogu soo dirtid natijjooyinkabaaritaanada caafimaad.

**Haddii aan caddaynta la helin ilaa iyo 31ka oktoobar**

Haddii adeega caafimaadka iskuulka ee magaalada Zurich ilaa iyo 31ka oktoobar ee sanad-dugsiyedka 1aad ee xanaanada caruurta, waxaan ilmahaaga ku casuumi doonaa rugta caafimaadka ardayda iskuulka. Marka innaga ayaa sameeyn doona baaritaanada caafimaad ee iskuulka - laakiin ma ahan sida baaritaanada 4-sanadlaha ah ee dhaqaatiirta caruurta ay u sameeyaan oo kale.

**Su'aalo?**

Su'aalaha badankooda (FAQ) waxaad jawaabahooda ka helaysaa  
[www.stadt-zuerich.ch/vorsorgeuntersuchung-kindergarten](http://www.stadt-zuerich.ch/vorsorgeuntersuchung-kindergarten)

Macluumaad dheeraad ah waxaa goor walba ka helaysaa dhaqtarkaaga Ciwaanada waxaad ka helaysaa warqada madaxeeda ama interneetka  
[www.stadt-zuerich.ch/schularzt](http://www.stadt-zuerich.ch/schularzt)



**Wargelin**

Waraaqaga iska diiwaangelinta xanaanada caruurta waxaa soo diay / soo diri doona xafiiska dawlada ee degmada.

Caruurta waxaan u rajaynaynaa waqtiga xanaanada caruurta iyo iskuulka oo caafimaad leh. Salaan wacan.

Adeegaaga caafimadka iskuulada